*Casharka Koowaad*

# *Noqo Qof Aqoon Leh*

*Ku dheh 'May siman yihiin kuwa wax yaqaan iyo kuwa aan wax aqoon?'*[3]

**Qur'aan**

Aqoontu kaalin mug leh ayay ka ciyaartaa horumarka aadamaha. Waxay dhistaa ilbaxnimo iyo inay ku hoggaamiso barwaaqo iyo badhaadhe nolosha ummadaha. Waxa ay sidoo kale carisaa guulaha nolosha laga gaadho. Aqoontu waxa ay xoreysaa dadka; waxayna u ogalaataa inay si xor ah u fekeraan.

Hoggaamiyuhu waa inuu aqoon ku hubaysan yahay judha horaba. Taa macnaheedu kama dhigna inaad shahaadooyin fara badan sidato, ee waa isticmaalka aqoonta aad baratay. "Aqoonta dhabta ahi waa tan ka caawisa inay bulshooyinku isbeddel ku tallaabsadaan".

Hoggaamiyuhu waa inuu ku qalabaysan yahay duruusta nolosha ee laga heli karo cilmiga falsafadda, taariikhda, juquraafiga, ilbaxnimada, siyaasadda, maamulidda dawladda, bini-aadantinimada, akhlaaqda

[3] Qur'aan (Surah Az-Zumar Ayah 9)

wanaagsan iyo is dhul-dhigidda. Mahathir sida uu ku xusay buuggiisa xusuustebyo[4] **(Memoirs),** waxaa uu ahaa qof aad wax u akhriya oo jecel aqooonta kala duwan oo ay ugu horreyso ka bogoshada taariikhda dadkiisa iyo marxaladihii ay soo martay. Waxa uu ahaa qofka ugu akhriska badan, ilaa lagu tilmaamay maktabadda fasalka, xilligii uu dhiganayay dugsiga hoose/dhexe ilaa kii sare. Akhriskaa dhugashada leh waxaa uu u horseeday inuu Malaysiya ku dhiso aqoontiisa, oo marka danbe qarxisay awoodda dadka Malaysiya, oo ku talaabsaday horumar baaxad weyn leh muddo ka yar 20 sanno.

Waxa uu bartay cilmiga dhakhtarnimada, oo uu ka bartay King Edward VII, oo ku yaalla imika dalka Singabuur. Waxa uu dhamaadkii 1960-kii ka mid noqday gudida tacliinta ee Jaamacadda Malaya (*University of Malaya*). Sidoo kale waxa uu noqday gudoomiyaha gudidada tacliinta sare ee wasaaradda waxbarashada ee dalka Malaysiya. Sannaddu markay ahayd 1974-kii waxa uu noqday wasiirka waxbarashada ee dalka Malaysiya.

Waxa uu xoogga saaray in aqoon tayo leh oo la falgasha nolosha dadka reer Malaysiya dhidibada loo aaso. Si uu taa uga midho dhaliyo, waxa uu manhajkii Malaysiya u beddelay oo xoogga saaray dhanka Sayniska iyo Teknooloojiyadda, oo ah tiirarka horumarka iyo dhaqaalaha qarnigan 21-aad.

Sayniska iyo Teknooloojiyaddu waa tiirarka horumarka iyo dhaqaalaha qarnigan 21-aad.

[4] Ereybixin: biography (Qofkahadal), autobiography (iskahadal), iyo memoir (xusuustebyo)!

Mahathir waxa uu is-waafajiyay raabitaanka ardayda takhasuska ay rabaan inay qaataan iyo horumarka ay dawladdu rabto inay ku tallaabsato, isagoo ku qancinaya ardayda in siyaasadda dawladda (*public policy*) oo la xoojiyaa ay xoojin doonto koboc dhaqaale oo kor u qaada dakhliga muwaadiniinta dalka Malaysiya. Sida uu ku xusay buuggiisa xusuustebyo, waxa uu yidhi, '*Ma jirto dawlad ka mida dawladaha soo koraya oo ku bixisay dhaqaalaha aan ku bixinnay waxbarashada mid la mida.*' In ka badan 25% miisaaniyadda dawladda ayuu ku bixinayay waxbarashada. Waxaa kharashkaas lagu bixinayay dhisidda iskuullo cusub oo isugu jira iskuullo hoose/dhexe ilaa kuwo sare oo casri ah, oo si fiican u qalabaysan. Waxaa iyana barbar socday dhisidda jaamacado cusub oo bixinaya waxbarasho tayo leh. Waxa uu Mahathir fursado waxbarasho dibadda ah siiyay in ka badan 50,000-60,000 arday oo waxbarasho heerka sare (*tertiary education*) u tagay dawlado kala duwan.

Dhammaan ardaydaasi waxa ay baranayeen sayniska, oo ah dhaqaajiyihii degdega ahaa ee horumarka Malaysiya. Qaar badan oo ka mid ah ardaydaa waxa ay ka soo jeedeen qoysas sabool ah, laakiin waxa ay ahaayeen arday si fiican wax u baratay, dawladduna ka caawisay inay sii wataan hayaankooda qalin beddelashada.

Mahathir waxa uu si xirfadeysan oo qorsheyn iyo baaraan degba ku jiro, isugu xidhay suuqa shaqada, ardayda jaamacadaha ka baxaya iyo koboca dhaqaalaha dalka. Waxaa ardayda loo sii diyaarin jiray shaqooyinkii ay qaban lahaayeen markay jaamacadda ka soo baxaan, si aan ardaygu shaqo la'aan ugu dhicin, dhaqaalaha dalkana aanu saameyn ugu yeelan.

Mar uu wariye Axmed Mansuur, oo ah wariye ka tirsan shabakada Aljazeera uu wareysi ka qaaday ra'iisul

wasaarihii hore ee dalka Finland, Tarja Halonen, oo uu weydiiyay su'aashan, 'Waa maxay sirta horumarka dalka Finland?' waxa ay ku jawaabtay, '*waxbarasho*, *waxbarasho*, *waxbarasho*.'

Aqoon ayaa lagu dhisaa ilbaxnimo iyo horumar, ee jahli laguma dhiso!

“

*Hoggaamintu ma aha dayax gacmeed cirka loo ganno (rocket science), ee waa xirfad la barto iyo qaayo soor si maalinle ah loo hirgaliyo.*

***Tun Dr. Mahathir Maxamed***